# La barashada af Ingiriis Carruurtaada iyo Dhalinta:Isticmaalida Jadwalka Shaqada ee lagu Tababaranayo Aqoonta Guud



Waqtiga shaqada waxay noqon kartaa waqti aad u fiican oo lagu tababarto xirfadaha luuqada hadalka iyadoo laga hadlayo cidda dhamaystiraysa shaqooyinkee iyo goorta.Isticmaal jadwalka shaqada ee lagu diyaarinayo wada sheekeysigaaga.

**Ka timid** Nicole DeSalle, Xiriiriyaha Qorayo, Xarunta Cilmi baarista Aqrinta Iowa
La soo dhigay:29/03/2022

*Qoraalka tafaftiraha:Wada barashada waxay sare u qaadi kartaa xirfadaha luuqada Ingiriiska carruurta iyo dhalinta sidoo kale sida midaada.Boostigaan wuxuu ka qeyb yahay taxane socdo oo loo naqshadeeyay inay caawiso daryeelayaasha ardayda af Ingiriiska inay helaan fursadaha barashada Ingiriiska ee loogu tallogalay qoyska nolol maalmoodkooda.*

Ku tababarashada af Ingiriiska adiga oo ku dhamesytirayo shaqada agagaarka guriga waa qaabka ugu wanaagsan oo adiga iyo carruurtaada ama dhalinta aad ka baraneysaan.Sababtoo ah shaqooyinka waxay qeyb ka tahay jadwalka maalinlaha ama isbuuclaha ah, xubnaha qoyska waxay leeyihiin fursado badan oo ay ugu dhaqmaan qaabdhismeed erayada iyo jumlada, taas oo laga yaabo inay sare u qaado aqoontooda guud ee Ingiriiska.Intooda badan, nidaamka go'aansanayo shaqooyinkee u baahan in la sameeyo, markii ay u baahantahay in la sameeyo, iyo u xilsaarida shaqooyinkaas xubnaha qoyska waa tusaalaha dhibaato xalinta.Cilmi baaris ayaa muujineyso in markii ardayda af Ingiriiska ka wada shaqeeyaan si ay u xaliyaan dhibaatooyinka, waxay si taxadar ah xooga u saaraan qaabdhismeedka luuqada si markaas ay u muujiyaan micnahooda sida saxda ah ee cad ee suurtogalka ah (Kim, 2008).

## Wada Dhisida Cilmiga Taariiqda

Ardayda af Ingiriiska, warbixintaan waxtar ayay u leedahay in la ogaado ka hor inta aadan bilaabin howlaha ku jiro boostigaan.

*Shaqada* waa howl aad ku sameysid agagaarka guriga.Shaqooyinka qaar waxaa la sameeyaa maalin walba.Shaqooyinka qaar waxaa la sameeyaa isbuuc walba.

Halkaan waa tusaalooyinka qaar ee shaqooyinka caadiga ah:

- nadiifi qolkaaga
- hagaaji sariirtaada
- xulo/meel dhigo/raarici dharkaaga
- dhaqo maacuunta
- dhaqo gaariga
- u xiir cowska/jar cowska
- xulo boombalaha
- diyaari/kari cashada
- hagaaji miiska
- banee miiska
- dhaq maacuuntaada
- nadiifi farantijeerka ama qaboojiyaha
- nadiifi qubeyska ama tuubada
- dhaq dharka
- qalaji dharka
- meel dhigo dharka
- maro qoyan mari dhulalka
- fakuumgaree rooga/caga saarka
- xaaq caleemaha deyrta
- badiil ku kuus barafka qaboobaha

---

Jadwalka shaqada waa qaab lagu diyaariyo shaqooyinka qoyska ee u baahan in la sameeyo.Waad sameyn kartaa jadwalka shaqada ee muujiyaa maalinta ama maalmaha isbuuca markii shaqooyinka u baahanyihiin in la sameeyo.Sidoo kale waad tusiin kartaa xubintee qoyska ee masuulka ka ah sameynta shaqooyinka (fiiri Illaha Dheeraadka ah ee Qoysaska oo naqshada jadwalka shaqada).

Waad ku weydiin kartaa su'aalaha xiggo carruurtaada ama dhalinta af Ingiriis ama luuqadaada hooyo:

- Maxay muhiim ugu tahay qof walba ee ku jiro qoyska in lagu caawiyo shaqooyinka?
- Shaqooyinkee ayaa la sameeyaa maalin walba?Shaqooyinkee ayaa la sameeyaa isbuuc walba?

- Shaqooyinkee ayaad u maleysay inaad ku wanaagsantahay?Waa maxay shaqada ugu yar ee aad jeceshahay?

Waxaad dooran kartaa inaad dib ula booqatid su'aalaha qaar ama dhammaan su'aalaha carruurtaada iyo dhalinta markii aad abuurtid oo aad isticmaashid jadwalka shaqadaada.

# Wada Dhisida Xirfadaha af Ingiriiska:Isticmaalida Jadwalka Shaqada ee lagu Tababaranayo af Ingiriiska

## Sameey Jadwalka Shaqada

Raac tallaabooyinkaan si aad u sameysid jadwalka shaqada sida jadwalka tusaalaha hoose.

- Qeybta koowaad, qor shaqooyinka kala duwan ee u baahan in la sameeyo.
- Safka kore, qor maalin walba ee isbuuca.
- Kala hadal carruurtaada iyo dhalinta shaqooyinka xubin walba ee qoyska ah sameynayaan isbuucaas.Qor magacyadooda oo dhinac ka ah shaqo walba iyo hoosteeda maalinta isbuuca (wax badan hoostaan).

### Lambarka 1.Tusaalaha Jadwalka Shaqada

**Jadwalka Shaqada Qoyska Garcia**

| **Shaqada** | **Isniin** | **Tallaado** | **Arbaco** | **Qamiis** | **Jimco** | **Sabtida** | **Axad** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Fakuum | | | Carmen | | | | |
| Samey dhar dhaqida | | | | | Aabaha | | |
| Samey alaab dhaqida | Carmen | Marco | Hooyada | Marco | Carmen | Aabaha | Aabaha |
| Hagaaji miiska | Marco | Carmen | Aabaha | Carmen | Marco | Hooyada | Hooyada |
| Nadiifi qolkaaga | | | | Carmen | Marco | | |
| Banaanka gee qashinka | | | Marco | | | | |

# Ku tababaro Xirfadaha Hadalka adiga oo Weydiinayo iyo Ka jawaabayo Su'aalaha ku Saabsan Mustaqbalka

U weydii oo uga jawaab su'aalaha si dhawaq dheer oo af Ingiriis ah si aad u go'aansatid cida masuulka ka noqoneyso shaqo walba.

- **Weydii:**Yaa banaanka geynayo qashinka isbuucaan?
- **Jawaab:**Waxaan sameynayaa Arbacada.

- **Weydii:**Yaa sameynayo maacuunta Isniinta?
- **Jawaab:**Waan sameynayaa iyaga.

## Ogeysiinta Naxwaha:“Waxaan” Iyo “U Socdaa”

Labadaba “waan” iyo “u socdaa” ayaa loo adeegsadaa inaad ka hadashid falalka mustaqbalka.Si kastaba, waxaa loo adeegsadaa daruufo kala duwan.

### Markii la Adeegsanayo "Waxaan“

Si loo sheego falalka mustabqalka waqtiga la hadlayo, la isticmaal, “waxaan.”Tusaale ahaan:

- **Qofka 1:**Yaa dhaqayo maacuunta Isniinta?
- **Qofka 2:**Aniga ayaa.
- **Qofka 1:**Way fiicantahay!Aan ku qorno magacaaga hoos ee jadwalka.

### Markii la Isticmaalayo “U Socdaa”

Si loo sheego qorshooyinka mustaqbalka ee la go’aansaday waqtiga hadalka ka hor, isticmaal “going to.”Tusaale ahaan:

- **Qofka 1:**Yaa hagaajinayo miiska caawa?
- **Qofka 2:**Ma hubo.Aan fiirino jadwalka.Marco wuxuu hagaajinayaa miiska caawa.

Midkee ayaad isticmaaleysaa markii aad buuxineysid jadwalka shaqada?Maadaama shaqada la go'aansanayo waqtiga aad buuxineysid oo aad ka hadleysid jadwalka shaqada, “waxaan” ayaa loo adeegsadaa ka hadalka falalkaan mustaqbalka.

Kadib markii aad dhameysid buuxinta jadwalka shaqada, adiga iyo carruurtaada iyo dhalinka waxaad joogteyn kartaan adiga oo adeegsanayo hab dhaqanka hadalka.Si kastaba, maadaama jadwalka uu muujinayo qorshooyinka mustaqbalka oo horaan loo go’aansaday, adeegso “going to” badelkii “will.”Isticmaal qaababka jumlada hoosta si aad ugu tababaratid adiga oo isticmaalayo “going to” markii laga hadlayo shaqooyinka.

### Qaababka Jumlada ee Laga Hadlayo Qorshooyinka Mustaqbalka ee Shaqooyinka

**Su'aasha**

- Yaa u socdo inuu ____ isbuucaan?

**Tusaalooyinka**

- Yaa u socdo inuu **sameeyo dhar dhaqida** isbuucaan?
- Yaa u socdo inuu **banaanka geeyo qashinka** isbuucaan?

**Ka jawaab**

- ________ ayaa ______xiliga _______.

**Tusaalooyinka**

- **Aabaha** wuxuu u socdaa inuu **sameeyo dhar dhaqidaJimcaha**.
- **Marco** wuxuu u socdaa inuu **geeyo banaanka qashinkaArbacada**.

## Ku tababaro Xirfadaha Hadalka adiga oo Weydiinayo iyo Ka jawaabayo Su'aalaha ku Saabsan Waqtiga la soo dhaafay

Adiga iyo carruurtaada ama dhalinta ayaa sidoo kale isticmaali karo jadwalka shaqada si loo joogteeyo raadraaca shaqooyinka iyaga oo la dhameystirayo.Tusaalaha hoose, aastaamaha "x" waxay muujineysaa shaqooyinka la sameeyay.

**Jadwalka Shaqada Qoyska Garcia**

| Shaqada | Isniin | Tallaado | Arbaco | Qamiis | Jimco | Sabtida | Axad |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Fakuum | | | x Carmen | | | | |
| Samey dhar dhaqida | | | | | Aabaha | | |
| Samey alaab dhaqida | x Carmen | x Marco | Hooyada | Marco | Carmen | Aabaha | Aabaha |
| Hagaaji miiska | x Marco | x Carmen | Aabaha | Carmen | Marco | Hooyada | Hooyada |
| Nadiifi qolkaaga | | | | Carmen | Marco | | |
| Banaanka gee qashinka | | | x Marco | | | | |

Iyo carruurtaada ama dhalinka, ka sax shaqooyinka la dhameystiray.Ku tababaro weydiinta iyo ka jawaabida su'aalaha ku saabsan shaqooyinka la dhameystiray.

- **Weydii:**Miyuu Marco hagaajiyay maacuunta Isniinta?
- **Jawaab:**Haa, wuu hagaajiyay.

- **Weydii:**Miyay Carmen nadiifisay qolka?
- **Jawaab:**Maya. Way u socotaa inay nadiifiso Qamiista.

## Ogeysiinta Naxwaha:"La soo dhaafay" iyo "Hadda Socoto"

Labadaba teenis ee la soo dhaafay iyo teeniska hadda socdo waxaa loo adeegsan karaa in looga hadlo shaqooyinka la dhameystiray, waxay ku xirantahay daruufaha.

### Markii la Adeegsanayo Teeniska La soo dhaafay

Ku isticmaal teeniska la soo dhaafay oo leh falka la dhameystiray oo aan laheyn wax natiijo ah ee xaadirkaan.Tusaale ahaan:

- **Qofka 1:**Miyii Carmen fakuum gareysay?
- **Qofka 2:**Haa, wuu fakuumgareeyay.

Isticmaal teeniska la soo dhaafay markii la bilaabayo waxyaabaha gaar ah ee ku saabsan markii falka la dhameystiray.Tusaale ahaan:

- **Qofka 1:**Miyay Carmen Fakuum gareysay?
- **Qofka 2:**Haa, waxay fakuum gareysay Arbacada

### Markii la Isticmaalayo Teeniska Hadeer Socda

Isticmaal teeniska Hadeer Socda oo leh falka dhammaaday iyo natiijada la joogo.Tusaale ahaan:

- **Qofka 1:**Miyuu Marco hagaajiyay miiska?
- **Qofka 2:**Haa, wuu hagaajiyay.Hadeer waan bixin karnaa cashada.

Isticmaal teeniska hadeer socda oo aan laheyn erayga waqtiga dhammaaday.Tusaale ahaan:

- **Qofka 1:**Miyay Carmen nadiifisay qolka?
- **Qofka 2:**Maya, maysan. Waxay u socotaa inay nadiifiso Qamiista.

Shaqooyinka marwalba ma ahan madadaalo.Laakin kala hadlida shaqooyinka carruurtaada waa qaab heer sare ee loogu tababarto xirfadahaaga af Ingiriiska.

## Illaha Dheeraadka ah ee Qoysaska

[Jadwalka Shaqada]

Isticmaal jadwalkaan si aad u buuxisid liiska isbuuclaha shaqooyinka la sameynayo, oo tilmaamayo xubintee qoyska ayaa sameynayo shaqo walba iyo maalintee ayay dhameystirayaan shaqo walba, oo kala hadla qoyska sida aad u aadid tababarka xirfadaha af Ingiriiska.

## Tixraacyada

Kim, Y. (2008).Ku deeqida iskaashiga iyo shaqooyinka gaarka ah ee helitaanka erayada L2. *Joornaalka Luuqada Casriga ah*, *92*, 114–130. http://www.jstor.org/stable/25172996